


Xagee baan ka raadsan karaa daryeel caafimaad? Var ska jag söka vård?



Xagee baan ka raadsan karaa daryeel caafimaad? Var ska jag söka vård?




Waxaad ka raadsan kartaa daryeel caafimaad meelaha caafimaadka oo kala duwan waxay ku xidhan tahay hadba dhibka ku haysataa nooca uu yahay. Badanaa waxaad caawimo ka heli kartaa xarunta caafimaadka (Vårdcentral). Wac 112 ama aad meesha dhakhtarka qaybta degdega/emergjensiga (Akutmottagning) hadii xaaladaadu khatar ku jirto.

Du ska söka vård på olika mottagningar beroende på vad du har för problem. Oftast kan en **vårdcentral** hjälpa dig. Ring 112 eller åk till en **akutmottagning** vid livshotande tillstånd.



Websaydhka/bogga 1177.se waxaad ka helaysaa macluumaad ku saabsan saxada iyo daryeelka caafimaadka oo ah luqado kala duwan. Waxaad kaloo ka heli kartaa meesha kugu dhow ee ah xarunta caafimaadka ama dhakhtarka qaybta deg dega ah/emergjensiga.

På webbplatsen 1177.se kan du få information om hälsa och sjukvård på olika språk. Du kan också hitta var din närmaste vårdcentral eller akutmottagning ligger.



Waxaad kale oo wici kartaa nambarka taleefanka 1177. Markaa waxaa kula hadlaysa kalkaaliso/neeras. Waxaad soo wici kartaa maalmaha oo dhan, habeenka iyo maalintaba.

Du kan också ringa telefonnummer 1177. Då får du prata med en sjuksköterska. Du kan ringa alla dagar, dygnet runt.



Waxaad heli kartaa caawin ah turjubaan af-somaali saacada 08.00-22:00 maalin kasta. Taleefanambarka: 0771-117791

Du kan få hjälp med tolk på somaliska klockan 08.00-22.00 varje dag. Telefonnummer: 0771-1177 91.



Kalkaalisada/neeraska ayaa ku siinaysa talooyin iyo caawin ku saabsan habkii aad ku xalin lahayd xanuunka ama dhaawaca markaad joogto guriga. Inta uusan wada hadalku dhamaan kalkaalisada/neeraska ayaa ku siinaysa warbixin hadii aad u baahan tahay inaad raadsatid daryeel caafimaad, meeshii aad la xidhiidhi lahayd iyo wakhtiga.

Sjuksköterskan ger dig råd och hjälp med hur du kan ta hand om sjukdomen eller skadan hemma. Innan samtalet avslutas informerar sjuksköterskan dig om du behöver söka vård, vart du ska vända dig och när.

Daryeelka deg-dega ah

Vårdcentral




Waxaad ula tegi kartaa xarunta caafimaadka badidooda xanuunada iyo dhaawacyada. Xarunta caafimaadka waxay tusaale ahaan kaa caawin karaan hadii ku haysay xumad mudo dheer, ama xasaasiyad ama hadii aad rabit inaad iska joojisid sigaark cabka.

Du ska gå till en vårdcentral för de flesta skador och sjukdomar. Vårdcentralen kan till exempel hjälpa dig om du har haft feber länge, har allergi eller vill sluta röka.



Xarunta caafimaadku waxay kale oo kaa caawin karaan hadii dhibaato kaa haysato xaga maskaxda/ dhimirka. Waxaad heli kartaa taageero iyo cid kula hadasha.

Vårdcentralen kan också hjälpa dig om du har psykiska problem. Du kan få stöd och någon att prata med.



Waxa kale oo xarunta caafimaadka kaa caawin hadii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo takhasus ah. Markaa xarunta daryeelka caafimaadka ayaa xidhiidh la samaynaysa meel kale oo lagugu qaabilo oo waxay u diryaan qoraal loo yaqaan Remiss.

Vårdcentralen hjälper dig vidare om du behöver mer specialiserad sjukvård. Då kontaktar vårdcentralen en annan mottagning. Detta kallas remiss.



Wac xarunta caafimaadka si aad wakhti u qabsatid ama u weydiisatid caawin. Xarumaha caafimaadku badanaa waxay furan yihiin maalamaha caadiga ah laga bilaabo subax ilaa gelinka danbe. Xarumaha caafimaadka qaarkood baa leh waxa loo yaqaan drop-in (xiliyo gaar ah oo bilaa balan lagu tago).

Ring till vårdcentralen för att boka tid eller be om hjälp. Vårdcentraler är ofta öppna på vardagar från morgon till eftermiddag. Vissa vårdcentraler har drop-in.




Habeenada, saqda dhexe iyo maalmaha fasaxyada waxaad aadi kartaa meelaha caafimaadka ee furan ee loo yaqaan Jourcentral ama Journmottgning. Halkaas waxaa lagaa caawin karaa hadii ay ku hayso dhibaato aanad la sugi karin maalinta ku xigta.

På kvällar, nätter och helger kan du gå till en öppen jourcentral eller journmottagning. Där får du hjälp om du har ett problem som inte kan vänta tills nästa dag.

Rugta daryeelka caafimaad

Akut vård



Xanuunada degdega ah am dhaawaca waxaad ula tagtaa dhakhtarka wayn qybtiiisa degdega ah (akutmottagning). Wac 1177 hadii aanad hubin meeshii aad la xidhiidhi lahayd.

Vid akuta sjukdomar eller skador ska du åka till en akutmottagning på ett sjukhus. Ring 1177 om du är osäker på vart du ska vända dig.



Tusaale ahaan xanuunada degdega ah waxaa ka mid noqon kara xanuun laabta ah oo degdeg ah, meel ku bakhtiday am ku curyaantay, laf ku jabtay iyo boog/nabaro waaweyn. Waxaad kale oo la xidhiidhi karaysaa xarunta caafimaadka degdega ah (akutmottagning) hadii uu ku hayo xanuun degdeg ah oo ah xaga maskaxda/dhimirka.

Exempel på akuta tillstånd är akut smärta i bröstet, förlamning, benbrott och stora sår. Du kan också vända dig till en akutmottagning vid akuta psykiatriska tillstånd.



Ha aadin xarunta caafimaadka degedega ah (akutmottagning) hadii dhibaataadaadu sahlan tahay. Markaas waxaad la xidhiidhi kartaa xarunta caafimaadka (vårdcentral) si lagu caawiyo.

Åk inte till akutmottagningen med lättare problem. Då ska du kontakta en vårdcentral för att få hjälp.



Wac 112 hadii aad xaalad khatar ah ku jirtid iyo hadii qof naftiis halis ku jirto. Waxaa ku caawin kara turjubaan xaga taleefanka hadii loo baahdo.

Ring 112 vid en akut situation och om någons liv är i fara. Du kan få hjälp av en tolk via telefon om det behövs.



Wac 112 hadii ay neefto kugu adag tahay, hadii dhaawac halis ah ku hayo, hadii laabta ka dareemaysid xanuun ama qof suuxay. Xarunta alarmka (Larmcentralen) ayaa qiyaasaya hadii loo baahan yahay ambulans.

Ring 112 om du har svårt att andas, är svårt skadad, har smärtor i bröstet eller om någon är medvetslös. Larmcentralen bedömer om det behövs en ambulans.

Daryeel caafimaadka ilkaha

Tandvård



Markaad u baahan tahay daryeelka ilkaha waxaad aadaysaa dhakhtarka ilkaha ee guud (Folktandvården) ama dhakhtar ilkaha oo kale oo gobolku tilmaamay. Waxaad ka raadin kartaa 1177.se meesha dhakhtarka ilkaha ee kuugu dhow.

När du behöver tandvård ska du gå till Folktandvården eller en annan tandläkare som regionen hänvisar till. Du kan hitta närmaste mottagning på 1177.se.



Saxada iyo daryeelka caafimaadku waa u bilaash caruurta inta ay ka gaadhayaan 19 jir. Dawada dhakhtaruku u qoro caruurta waa bila lacag/bilaash caruurta inta ay ka gaadhayaan 17 år. Dadka waaweyn yagu lacag bay bixinayaan.

Hälso- och sjukvård är gratis för barn till och med 19 år. Medicin på recept är gratis för barn till och med 17 år. För vuxna kostar det pengar.



Waa muhiim inaad kulanka (ballanta) timaadid. Soo wargeli ugu danbeyn 24 saacad ka hor booqashada haddii aadan iman karin. Haddii kale qarash ayaa lagugu soo dalacayaa.

Det är viktigt att du kommer till ditt besök. Meddela senast 24 timmar innan besöket om du inte kan komma. Annars måste du betala.



Kuli dadka aan ku hadlin luqda Iswidhishka waxay xaq u leeyihiin turjubaan. Noo sheeg inaad u baahan tahay turjubaan markaad wakhti qabsanaysid. Shaqaalaha ayaa turjubaan kuu qabanaya. Ma aha in caruurta ama qaraabadu kuu turjumaan.


Alla som inte kan svenska har rätt till tolk. Berätta att du behöver tolk när du bokar tid. Personalen bokar en tolk åt dig. Barn och släktingar ska inte tolka.



Shaqaalaha caafimaadka daryeelka iyo turjubaanadu sirta qofka ma gudbin karaan. Ma sii gudbin karaan war adiga kugu saabsan hadii aysan amar adiga kaa qaadan.

Vårdpersonal och tolkar har tystnadsplikt. De får inte berätta något om dig utan att du har godkänt det.

[illegible]



För info om symbollicenser: <http://www.dart-gbg.org/licenser>
Detta bildstöd är skapat via www.bildstod.se i samarbete med berörda verksamheter inom Västra Götalandsregionen.

www.kom-hit.se/flykting



Flykting



VÄSTRA
GÖTALANDSREGIONEN